



Ha caayina dadka dhintay, way la kulmeen waxay hor marsadeene

Caa'isha Allaha ka raali ahaadee waxay tiri: Nabigu scw wuxuu yiri: "Ha caayina dadka dhintay, way la kulmeen waxay hor marsadeene."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Albukhaari]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey inay xaaraan tahay in dadka dhintay la caayo iyo in sharaftooda wax laga sheego, taasina waa akhlaaq xumo, waayo waxay heleen waxay hor marsadeen ee acmaal fiican ama xun ahaa, caydaasina iyaga ma gaarayso ee waxay dhibaysaa kuwa nool.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5364>

النّجّاة الخيريّة
ALNAJAT CHARITY

